Talaabooyinka Koowaad ee Missouri
Qoraalka xuquuqda Waalidka

Wasaarada Waxbarashada Dugsiyada Hoose iyo Sare ee Missouri(DESE). Wasaarada ayaa xaqiijisa in mashruuca Talaaba Koowaad la socdo Qeybta C ee Sharciga Waxbarashada shaqsiyaadka laxaadka daran (IDEA), sharcigani wuxuu suuto galinayaa dhamaanba caruurta u qalanta iney helaan adeegyada ka hortaga degdega ah iyada oon loo eegin jinsiyad, diin, dhaqan, iyo awood dhaqaale. DESE waxay qandaraas la gashey toban hay'adood si loo hirgaliyo mashruuca Talaabooyinka Koowaad (First Steps) ee xafiisyada gobolada, hay'adahaasi oo marka la soo gaabiyo magacoodu yahay (SPOE).

First Steps, Waalidku Waxay Xaq u leeyihiin:

Ogeysiiska Qoraal ah 1
Ogolaansho 1
Adeega sida Gaarka ah Qoyska Lowgu Qorsheeyey (IFSP) 2
Dahsooni ah 2
Baabi'inta Warbixinta 3
Muraajicada Diiwaanka 3
Dhexdhexaadin 4
Ilmaha oo Loo Dacwoodo 5
Xeerka Maxkabada ee Dhigaya inaan Xuquuqdiisa Qofka lagu Xadgudbin 6
Adeegyada Waxbarashada Kumeelgaadhka ah 8

Ogeysiiska Qoraal ah

Waa waajib in waalidiintu ay helaan ogeysiis qoraal ah, ka hor waqtiga SPOE aaney qorshaha galin ama diidin iney bilaabaan ama bedelin aqoonsiga (u qalmida), qiimeynta, meesha ama adeegyada ilmaha ama qoyska la siinayo, Ogeysiisku waa inuu waalidka la socodsiiyaa talaabada la qaadey ama ujeedada lagu diidey.Waa waajib in ogeysiiska la bixiyey ay la socoto koobi ah qoraalka xuquuqda Waalidka.

Ogeysiisku waa in loo qoraa hab fudud oo uu dadweynuhu fahmi karo iyo luqada qoyska u ah afkooda hooyo. Micnaha looga jeedo afka hooyo waxaa weeyaan luqada uu waalidku ku hadlo. Hadii uu qoysku isticmaalo luqada dhagoolayaasha (sign language) ama (Braille) qoraalka lowgu talo galey indhoolayaasha, waxay xaq u leeyihiin iney ku helaan ogeysiiska sida ku haboon qoyska.

Ogolaansho

Ogolaansho micneheedu waa: waalidka si buuxda ayaa loola socodsiiyey dhamaanba warbixinta la xiriirta howsha looga codsadey ogolaanshaha, luqada waalidka u ah afkiisa hooyo ama hab kale oo loo wada hadli karo; wuu fahamsan yahay kuna waafaqey iyadoo qoraal ah in la fuliyo barnaamujka ogolaanshaha looga codsadey; wuuna fahamsan yahay in ogolaanshaha uu yahay mid uu iskii u sameeyey kana noqon karo markii uu rabo. Hadii waalidku dib uga noqdo ogolaanshaha tani ma saameyneyso wixii dhacay ka hor intaanuu ka noqonin ogolaanshaha.

Waa waajib in la helo ugu horeyn qoraal ah ogolaanshaha waalidka:

- qiimeynta iyo dib u eegida ilmaha oo la hayo;
- adeegyada oo la siiyey ilmaha ama qoyskaba;
- caymiska dadweynaha (MOHealthNet/Medicaid) ama waxaa la isticmaaley caymis gaar ah; iyo,
- la isweydaarsadey ama la codsadey warbixinta qofka aqoonsigiisa kaasi oo aan ka tirsaneyn (First Steps)

Marka waalidku bixiyo ogolaanshaha ah in la sameeyo dib u eegid/qiimeyn ilmaha, dib u eegida waxaa sameynaya ugu yaraan laba qof oo khibrad leh oo yaqaan ilmaha noloshiisa, kuwaasi oo ka soo heley macluumaadka ilo kala duwan. La eegey waraaqaha caafimaadka, meelaha u wax ka bartey, maamulida qiimeynta iyo tixraacyada ilmaha oo sheegaya hanaanka wax fahamkiisa iyo awooda jidhkiisaba, la qabsiga, la hadalka dadka, fikirka, awooda jidhka (marka lagu daro araga iyo maqalka) iyo la dhaqanka bulshada/ shucuurta, ilaa waraaqo dhaqtar ama qoraalo kale ay cadeeyaan u qalmitaanka ilmaha. Ogolaanshahani waxaa kale oo raaca, qiimeynta hore ee ilmaha u diyaarineysa Adeegyada Sida Gaarka ah Qoyska Lowgu Qorsheeyey (IFSP) iyo si loo ogaado waxyaabaha gaarka ah ee uu ku fiican yahay iyo meelaha uu uga baahan yahay in laga caawiyo (la qabsiga, la hadalka dadka kale, fikirka, awooda jidhka (marka lagu daro araga iyo maqalka) iyo la dhaqanka bulshada/shucuurtiisa), ayada oo ay raacdo u fiirsasho loo fiirsadey ilmaha iyo qiimeynta ilmaha, ilaa waraaqo dhaqtar ama qoraalo kale ay cadeeyaan u qalmitaankiisa mooyee.

Marka waalidku bixiyo ogolaanshaha qiimeynta ee markaasi la wado ee ilmaha ku saabsan, qiimeynta waxaa dhameystirey ugu yaraan laba qof oo khibrad leh soona ururiyey macluumaad nooc kasta ah sida koritaankiisa (dabeecadaha la qabsiga, la hadalka dadka, hanaanka wax fahamkiisa iyo awooda jidhkiisaba, (marka lagu daro araga iyo maqalka) iyo la dhaqanka bulshada/shucuurtiisa, ilaa waraaqo dhaqtar ama qoraalo kale ay cadeeyaan u qalmitaankiisa mooyee.

Waalidiinta ilmaha laxaadka daran way aqbali karaan ama diidi karaan adeegyada ilmaha ama qoyska waqtigii ay iyagu doonaan. Waalidku way diidi karaan adeega xataa ka dib markay aqbalaan, taasi oon saameyn ku yeelan doonin adeegyada kale.

Hadii ogolaanshaha aan la bixinin, SPOE waajib ayay ku tahay in ay qeexdo qiimeynta iyo dib u eegida ama adeegyada uu heli karo ee caawin kara waalidka iney fahmaan in ilmahoodu aanuu heli doonin qiimeynta iyo dib u eegida ama adeegyada jeeroo ogolaansho la helo.

Hadii ogolaansha aan la bixinin, SPOE caqabadeyn mayso go'aanka waalidka. Hayeeshee, hadii aaney waalidku bixinin ogolaansho una muuqato inuu ilmahu dayacan yahay marka loo eego sida uu dhigayo sharciga Missouri, warbixin ayaa loo gudbin doonaa dowlada waa sida uu dhigayo sharciga gobolku.

Adeega sida Gaarka ah Qoyska Lowgu Qorsheeyey (IFSP)
Mudo 45 maalmood gudahood ah marka la soo gudbiyo, waxaa waajib ah in kulan la qabto ilmo kasta iyo qoyska u qalma mashruuca si loo bilaabo IFSP. IFSP waxaa loo qorey sanad, waana la muraajeceeyaa lixdii biloodba ugu yaraan hal mar. IFSP waxaa la socota: ilmaha horumarka uu sameynayo ee hada la arkaayo, maxsuulka ilmaha iyo qoyska; sida loo cabirayo sida wax u socdaan; habka lacag bixinta adeegyada; iyo wada xaajoodka ku saabsan heererka ilmuhu ka gudbayo mudada ilmuhu ka tirsan yahay Talaabada Koowaad (First Steps) iyo marka uu ka tagayo Talaabada Koobaad (First Steps) ee ah marka uu sadex jirsado.

Dahsooni ah
Barnaamijka First Steps warbixinta loo soo gudbiyo ee ku saabsan ilmaha iyo qoyska waxay diiwaanka ku xafidaan kambuutarka iyo waraaqaba warbixinta ilmo kasta oo barnmaamijka loo soo gudbiyo. Warbixinta waxa laga heley qoyska, gargaarayaasha, iyo qaar waalidku cadeeyey iney yaqaanaan ilmaha. Warbixinta waxaa loo adeegsadey gudbinta, ogolaanshaha, go'aaminta u qalmitaanka IFSP. SPOE waxaa ku waajib ah iney ilaaliyaan waraaqaha aqoonsiga shaqsiga. Warbixintani iyo sida loo ururinaayo ama loo diiwaan galinayo, habka loo adeegsanayo warbixinta, sida loo haynayo, bandhigid iyo marxaladaha baab'inta warbixita.

Waxaa waajib ah in la helo ogolaansho qoraal ah ka hor inta aan meel kale oo ka baxsan First Steps lala wadaagin qofka warbixintiisa. First Steps iyo shaqaalaha SPOE, Iskuduwaha u qaabilsan ilmaha, kuwa u qaabilsan gargaarka ilmaha, Xafiiska maalgalinta iyo DESE.

Baabi'inta Warbixinta
SPOE wey xafidaa warbixinta kasta ee waraaqaha ah iyo kuwa kombuterka ku jiraba ee looga soo gudbiyey First Steps. Waraaqaha ilmaha warbixintiisdu ku qorantahay SPOE waxay haysaa ugu yaraan mudo ah sadex sano taasi oo ka bilaabanta taariikhda ilmaha uu dhameysto adeegyada wax ka ogaashaha ilmaha ka dibna ilmaha waraaqaha macluumaadkiisu ku dhigan yihiin waa la baabiin doonaa. Waalidku laga yaabaa iney qoraal ku codsadaan in warbixinta aqoonsiga ilmahooda la baabiiyo isla marka adeega laga maarmo. Hase yeeshe. Warbixinta lagu hayo kambuutarka sida ilmaha taariikhda dhalashadiisa, cinwaanka waalidka, teleefan lambarka, magaca Iskuduwaha Adeega iyo gargaarayaasha mashruuca, IFSP ka ilmaha, iyo macluumaadka xafiisku qoro iyo warbixinta laga reebo marka ilmaha howshiisu dhamaato waxaa xafidaaya warbixintaasi barnaamijka (First Steps) iyada oon waqti loo cayimeynin.

Muraajicada Diiwaanka
Waalidka caruurta ee diiwaankoodu yaalo mashruuca Talaabada Koowaad(First Steps) waa ay eegi karaan diiwaanka laga hayo ilmaha iyo qoska ilmuhu ka tirsan yahay. Wayna eegi karaan wixii la xiriira warbixinta ilmaha ee kombutarka ama waraaqaha lagu hayo ee dib u eegida iyo qiimeynta lagu go'aaminayo u qalmitaanka IFSP, macluumaadka xafiisku qoro, ee ku saaban khaasatan cabashooyinka khuseeya ilmaha, ama wax ala wixii kale ee ku jira ilmaha warbixintiisa ee lagu hayo diiwaanka.

SPOE waa ku waajib iney waalidka uga jawaabto hadii ay ka codsadaan iney heli karaan warbixinta diiwaanka lagu hayo, iyada oon dib loo dhigin, ka hor inta aan la yeelan shirka IFSP ama wax dhageysi ah, waana ineyna qaadanin in ka daban mudo dhan toban cisho oo ka bilaabanta marka la helo codsiga.

Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin:

- jawaab inay ka helaan SPOE marka ay codsadaan tafaasiil ah warbixinta ilmaha ee diiwaanka lagu hayo;
- Codsadaan in SPOE siiso koobi ah warbixinta ilmaha ee diiwaanka lagu hayo; iyo,
- Iney waalidku doortaan qof u sameeya muraajacada warbixinta ilamaha ee diiwaanka lagu hayo.

Hadii dokumeetiga ku saabsan wax ka ogaanshaha ilmuhu ay khuseysa ilmo kaliya ama in ka badan, waalidka caruurtaasi dhaley waxay xaq u leeyihiin iney arkaan oo muraajeceeyaan warbixintaasi kaliya ku saabsan ilmahooda.

Waxaa laga yaabaa in SPOE u qaataan in waalidku sharci ahaan awood u leeyahay inuu eego warbixinta diiwaanka lagu hayo ee ilmaha jeeroo SPOE loo soo gudbiyo warbixin sheegeysa in waalidku aanay sharci ahaan u banaaneyn inuu eego iyada oo ay sabab u tahay masuuliyada ilamaha oo laga wareejiyey, gobolka oo masuul ka ah ilmaha, qof gobolku ilmaha masuul uga dhigey, waaldika oo aan wada nooleyn iyo iyaga oo kala tagey.

SPOE waxaa ku waajib ah iney dokumeeti ka reebaan qofka ilmaha warbixntiisa waraaqaha lagu hayo eegaya, marka laga reebo kuwa ka midka ah Talaabada Koobaad(First Steps), marka lagu daro magaca qofka, taariikkhda inuu eego loo fasaxay, iyo ujeedada uu u eegaayo

warbixinta diiwaanka lagu hayo. Waalidka laga yaabaa iney helaan, sida ay codsadeen, liisto ah nooca iyo meesha uu yaalo warbixinta Talaabada Koowaa (First Steps) ay isticmaashey.

SPOE waxa laga yaabaa iney lacag ka qaadaan koobiyada diiwaanka, kaliya hadii aaney tani waalidka ka hor istaageynin iney warbixinta diiwaanka eegaan. Lagama yaabo in SPOE ay lacag ka qaado hadii la raadiyaan ama la ururinayo warbixinta. Waa ku waajiba in SPOE ay waalidka siiso iyada oon wax lacag ah ka qaadin, koobi ku saabsan qiimeynta iyo dib u eegid kasta ee ilmaha iyo IFSP sida ugu dhaqsaha badan ka dib shir kasta oo ay yeeshaan IFSP.

Waalidka rumeysan in aanu sax ahayn warbixinta ilmaha ee lagu hayo diiwaanka, ama lagu xadgudbey waxyaabihii ku haboonaa inaan la sheegin ama xuquuqda ilamaha ama waalidka lagu xadgudbey waa iney qoraal ku codsadaan in SPOE bedesho warbixinta. SPOE waa iney go'aan mudo gaaban ku gaadho marka ay hesho codsiga in la bedelo iyo in kale. Hadii SPOE ay diido iney bedesho warbixinta waa in SPOE ay la socodsiiso waalidka diidmada ayna wargaliso waalidka iney xaq u leeyihiin dhageysi maxkabadeed.

DESE sida laga codsadey waa iney siiyaan waalidka fursad ay ku helaan dhageysi maxkabadeed oo ay kaga doodaan warbixinta ilmaha ee diiwaanka lagu hayo, si loo hubiyo inay tahay mid sax ah oo aan lagu xadgudbin wixii ku haboonaa in la qariyo ama ilmaha xuquuqdiisa ama ta waalidka. Waalidku waxay ku codsan karaan dhageysiga xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin iyaga oo la soo xiriira DESE.

Hadii dhageysiga maxkabada lagu helo in warbixinta ay qaldaneyd ama lagu xadgudbey wixii in la qariyo ahaa ama xuquuqda kale ee ilmaha, SPOE waxaa ku waajib ah iney bedelaan warbixinta qoraalna ay kula socodsiiyaan waalidka.

Hadii dhageysiga maxkabada lagu helo in warbixintu ay sax ahayd, oo aan lagu xadgudbin wixii ku haboonaa in la qariyo ama xuquuqda kale ee ilmaha, DESE waa inay la socodsiiyo waalidka in ay xaq u leeyihiin iney warbixinta diiwaanka lagu hayo ku lifaaqaan qoraal sheegaya ujeedada khilaafka go'aanka dhageysiga maxkabada. Qoraal kasta oo lagu lifaaqo diiwaanka warbixinta ee ilmaha waa in SPOE u xafidaa sidii qeyb ka mid ah warbixinta diiwaanka ilmaha ilaa iyo mudada diiwankaasi la hayo. Hadii warbixinta ilmaha ee diiwaanka lagu hayo qeyb ka mid ah la isku qabsadey oo warbixinta diiwaanka ay SPOE gudbisey waxaa waajib ah in iyadoo qoraal ahna lala gudbiyo.

Dhexdhexaadin
Waalidka iyo DESE, SPOE ama gargaaraha waxaa la siin doonaa fursad ah iney isticmaalaan dhexdhexaadinta si ay iskugu afgartaan is maandhaafka iman kara mar kasta. Waalidka xiiseynaya dhexdhexaadinta waa iney u gudbiyaa codsigooda DESE.

Dhexdhexaadinta qoraalka lagu codsadey waa in ay la socoto:

- Magaca iyo halka lagala xiriirayo qofka codsadey dhexdhexaadinta.
- Sheegana hadii ay dhexdhexaadintu ku saabsan tahay cabashada ilmaha ama dhageysi maxkamadeed.
- Sharaxaad kooban ka bixiyaa nooca dhibta jirta; iyo
- Xalka laga gaadhey dhiba jirta.

Dhexdhexaadintu waa:

- Iskood ayey u sameynayaan qeybaha is hayaa;

- Looma isticmaalaya in lagu diido ama lagu daahiyo waalidka xaqa uu u leeyahay nidaamka dhageysiga xuquuq dhowrista, ama diidmo xuquuq kasta oo hoos timaada qeybta C ee IDEA; iyo,
- In ay fuliyaan dhexdhexaadiyaal ay ka reeban tahay eex kuwaasi oo u tababaran una leh khibrad.
  Dhexdhexaaiyaha ka reeban eexdu lagama yaabo inuu ahaado mid u shaqeeya DESE, SPOE ama kuwa adeega ilmaha bixiya; waana in aanuu waxba kaga jirin is qabadka. Qofka loo doortey dhexdhexaadintu uma shaqeeyo DESE maxaa yeeley isaga/iyada DESE ayaa mushahar ku siisey inuu noqdo dhexdhexaadinta.

Adeega dhexdhexaadintu waalidka lacag uguma fadhido. Waalidka iyo DESE waxaa ku waajib ah iney waafaqaan isticmaalka dhexdhexaadinta oo adeegsadaan dhexdhexaadiye aan eex aqoonin kaasi oo ay ka xusheen liistada DESE ee dhexdhexadiyaasha u qalma howsha.

Dhexdhexaadinta waa in la qabto 15 maalmood gudahood taasi oo ka bilaabma mudada la xushey ee dhexdhexaadiyaha iyo goobta ay ku heshiiyaan in lagu qabto waalidka iyo DESE. Doodaha la is weydaarsado waqtiga dhexdhexaaadintu socota waa inaan la sheegsheegin aan loona isticmaalin marag ahaan marka la qabanayo dhageysiga xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin, dacwada maxkabada ama maxkabada dowlada dhexe iyo maxkabada gobolka ama nooc kasta oo dacwad ah ha ahaatee. Dhexdhexaadinta waa waajb in la dhameeyo mudo dhan30 maalmood gudahood si go'aanka loo gaadho.

Lama ogola in ka badan sadex qof iney soo raacaan waalidka ama dhinaca kale ee dhexdhexaadintu ay dhex mareyso jeeroo labada dhinacba ay isku raacaan in loo ogolaado. Qareenada looma ogola iney ka qeybqaataan ama goobjoog ka noqdaan dhexdhexaadinta. Waalidka waxaa laga yaabaa iney soo kaxaystaan qof taageersan iyaga.

Wixii heshiis ah ee ay isku afgartaan labada dhinac inta dhexdhexaadintu u socota waa waajib in qoraal lagu bayaamiyo heshiiskaasi oo ah in sharci ahaan la adeeco. Heshiisku wuxu sheegayaa in waxyaabaha laga wada hadlo mudada dhexdhexaadinta lagu jiro ay yihiin qaar qarsoon oon loo isticmaali karin dhageysiga xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin ama dacwada madaniga ah. Heshiiska waa in ay saxeexaan waalidka iyo wakiilka DESE ama SPOE kaasi oo xiriir la leh wakiilka. Heshiisku waa mid laga hirgalin karo gobol kasta maxkabadiisa sare ama maxkabada degmooyinka wadanka Mareykanka.

Ilmaha oo Loo Dacwoodo
Hadii qof ama urur aaminsan yahay in DESE, SPOE ama gargaar bixiyuhu ku xadgudbey Sharciga gobolka ama Dowlada Dhexe ama qawaaniinta Qeybta C ee IDEA, waxay qoraal saxeexan oo ah dacwada ilmaha ku saabsan ka oogi karaan DESEgudaheeda.

Dacwada ilmaha oo qoraal ah waa in la raaciyo:
- Qoraal sheegaya in DESE, SPOE ama adeeg bixiyuhu ku xadgudbey waxyaabaha sharciga u ah Qeybta C ee IDEA;
- Xaqiiqada uu ku saleysan yahay qoraalku; iyo,
- Saxeexa iyo halka lagala soo xiriirayo qofka oogaya dacwada.

Hadii Dacwadu ay khuseyso ilmo la garanayo, dacwada ilmaha oo qoraal ah waa in lagu raaciyo:
- Magaca ilmaha iyo cinwaankiis;

- Magaca gargaar bixiyaha ilmaha;
- Sharaxaad ku saabsan dhibta jirta, marka lagu daro xaqiiqooyinka la xiriira dhibta; iyo,
- Xalka loo heley dhibaatada.

Dacwadu waa iney ku saabsanaato xadgudub dhacdey mudo aan ka badneyn hal sano oo ka bilaabma taariikhda dacwada la heley.

Qofka dacwada oogayaa waa inuu u diraa koobi ah dacwada SPOE ama kuwa bixiya adeega ilmaha isla marka DESE laga xereeyo dacwada. Qofka dacwada soo oogey waa inuu diraa warbixin dheeraad ah, ama ha ahaato mid afka ah ama qoraal ah oo ku saabsan dacwada.

DESE, SPOE ama adeeg bixiyuhu waxay heli doonaan fursad ay kaga jawaabaan dacwada, waxaa iyana jiri doonta fursad waalidka iyo DESE ay heli doonaan, SPOE, ama adeeg bixiyuhu si tabaruc ah ugaga qeybgali doono dhexdhexaadinta.

Dacwada waa la baadhi doonaa iyada oo dib loo eegayo dhamaanba warbixinada la xiriira taasi oo laga yaabo in la wareysto waalidka, adeeg bixiyaha ama dad kale oo warbixin haya. Baadhitaan ayaa lagu sameyn doonaa isla meesha waa hadii DESE ay go'aan ku gaadho iney tahay lagama maarmaan. Waxaa loo diri doonaa dhamaanba inta howsha ku jirta go'aan qoraal ah oo ku saabsan xaqiiqada la heley, gabagabada iyo go'aanka kama danbyenta ah ee ay DESE gaadhey ee ah in DESE, SPOE ama adeeg bixiyuhu ku xadgudubtey Qeybta C ee IDEA iyo in kale isla mudo dhan 60 maalmood gudahood oo ka bilaabma marka dacwada la soo oogey. Mudada 60 maalmood waxaa la biirin karaa kaliya hadii ay timaado marxalad aan la dhaafi karin ama hadii waalidka ama DESE, SPOE ama adeeg bixiyuha ay isku raacaan in la kordhiyo waqtiga lagaga qeybqaadanayo dhexdhexaadinta.

Hadii DESE, SPOE ama gargaar bixiyuhu lagu helo xadgudub, DESE waa ku waajiba iney arinta ka hadlaan sidii ay wax uga qaban lahaayeen xadgudubkaasi, iyada oo ay raacdo, sida ugu haboon ee adeegyada joogsadey dib lowgu bixiyo, lacag dib loogu celiyo, ama talaabo kale oo wax ka tari karta ilmaha baahidiisa iyo adeegyada ay u baahan yihiin mustaqbalka qoysaska iyo ilmaha laxaad darada qaba.

Hadii dacwad qoraal ah la helo taasi oo ku socota dhageysiga xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin, ama ka kooban laba arimood oo ka mid ah dhageysigaasi, DESE baadhi meyso qeybta dacwada ee ku socota dhageysiga xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin ilaa la gabagabeeyo dhageysiga. Hase yeeshee, dacwad kasta oon ka mid hayn dhageysiga waa waajib in xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin la baadho mudo dhan 60 maalmood gudahood ee loo qabtey.

Hadii arinka dacwada ee ilmaha hore go'aan loogaga gaadhey xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin taasi oo lagaga dacwoonaayo kuwii hore looga dacwoodey, arinkani waxaa ku shaqo leh xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin. DESE waxa waajib ku ah iney la socodsiiyo qofka dacwada soo oogaya go'aankaasi la gaadhey. Dacwada ay soo oogto DESE, SPOE, ama adeeg bixiyaha ee ku guuldareysta iney raacaan go'aanka xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin waa in DESE baadhaa.

Xeerka Maxkabada ee Dhigaya inaan Xuquuqdiisa Qofka lagu Xadgudbin
Waalidka iyo DESE xaq ayey u leeyihiin iney si wada jir ah u xaliyaan isqabadka jira iyagoo raacaya nidaamka loo yaqaan dhageysiga xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka

xuquuqdiisa lagu xadgudbin. Si loo bilaabo nidaamka dhageysiga xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin, waxaa waajib ah in codsi qoraal ah oo sharxaaya dhibta jirta loo soo gudbiyo DESE.

Qoraalka ah codsiga waa iney la socdaan; xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin

- Magaca iyo halka lagala xiriiryo qofka codsanaya dhageysiga xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin.
- Magaca iyo cinwaanka ilmaha
- Sharaxaad ah waxyaalaha la isku haysto; iyo
- Xalka loo heley isqabadka

Codsiga dhageysiga xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin waa waajib inaan is qabadka laga hadlayaa aanuuu dhicin mudo ka badan sanad oo ka bilaabanta taariikhda codsiga la sameeyey.

Xeerka dhageysiga maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin waa inuu ka dhacaa goob waalidka u dhow,DESE waa iney hubisaa in xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin aanuu ka danbeynin mudo dhan 30 maalmood ka dib marka la heley codsiga waalidka, dhageysiga xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin markuu dhamaado waa in loo diro labada dhinacba qoraal ku saabsan go'aanka. Sarkaarka dhageysiga ayaa laga yaabaa inuu kordhiyo waqtiga in ka badan 30 maalmood waa hadii labada dhinac mid codsado.

Dhageysiga waxaa ururin doona sarkaalka dhageysiga oon eexan doonin oo kharashkiisa ay bixineyso DESE. Sarkaalkani waa waajib inuu ogyahay adeega ka hortaga degdega ah, Waxyaabaha layska rabo ee Qeybta C iyo baahida ilmaha iyo qoyska ay qabaan, waana waajib ah inaanu ahanin shaqaalaha DESE, SPOE, gargaar bixiyaha kuwaasi oo ilmaha siiya adeega. Sarkaalka dhageysigu waa inaanuu wax dan ah ka lahayn taasi oo saameyn ku yeelan karta go'aanka eex la'aanta ah ee uu gaadhi lahaa. Sarkaalka dhageysigu waa in aanuu shaqaale ka ahaanin dhamaanba kooxaha ku shaqo leh ilmaha. Sarkaalka dhageysigu waa in aanuu ka ahayn shaqaale DESE, sarkaalka dhageysiga waxaa mushaharkiisa bixisa DESE, taasi oo ah inuu kaliya fuliyo xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin. Sarkaalka dhageysigu wuxuu dhageysan doonaa waxa ay soo bandhigaan dhamaanba dhinacayada is haya, dibna u eegi doona warbixinta la soo bandhigo, si uu u gaadho go'aanka arimaha loo soo bandhigey kana bixin doonaa go'aan qoraal ah.

Waalid kasta oo ku lug leh dhageysiga maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xad gudbin:

- lahaadaan qareen u hadla iyaga iyo qof khibrad u leh ama u tababaran; adeegyada wax ka ogaanshaha ilmaha gaar ahaan caruurta laxaadka daran;
- soo bandhiga cadaymo kuna dhiirada inuu su'aalo weydiiyo markhaatiyadana ku waajib yeela iney yimaadaan;
- kana reeba cadaymaha aan lala wadaagin waalidka ugu yaraan mudo dhan shan maalood ka hor dhageysiga;
- hela qoraal bilaash ah ama habka electariga ee la isku gubiyey warbixinta oo ah ereyada loo isticmaaley dhageysiga; iyo,
- la helo koobi ah bilaash oo ka kooban go'aanka kama danbeynta ah oo ay la socdaan qoraal ah xaqiiqooyinka la Heley.

Hadii xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin uu ku lug leeyahay adeegyada wali socda ee ilmaha, inkastoo waalidka iyo DESE aaney isku raacin, SPOE, ama gargaar bixiyaha, ilmuhu wuu sii wadanayaa helitaanka adeegyada ee hoos yimaada IFSP kuwaasi oo la siinaayey ilamaha mudada waalidku codsadey nidaanka dhageysiga xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin. Hadii xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin ay ku saabsan tahay adeegyo khaas ah, ilmuhu way u sii socon doontaa gargaarka uu helo ee aan la isku diidaneyn.

Hadii waalidka iyo DESE ay isku diidan yihii go'aanka kama danbeynta ah ee xeerka maxkabada ee dhigaya inaan qofka xuquuqdiisa lagu xadgudbin, labada dhinacba waxay xaq u leeyihiin iney racfaan ka qaataan gobolka ama maxkabada dowlada dhexe

Adeegyada Waxbarashada Kumeelgaadhka ah
Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay Waxbarashada Kumeelgaadhka ah hadii uu ilmuhu yahay mid gobolku uu ka mas'uul yahay ama aanuu lahayn waalid la garanayo ama heli karaayo. Waxbarashada Kumeelgaadhka ayaa ilmaha wakiil ka ahaaneysa qiimeynta iyo dib u eegida ilmaha, horumarinta iyo muraajaceynta IFSP, adeegyada la siinayo iyo wixii xuquuq uu leeyahay ee lagu aasaasey IDEA.

SPOE waxaa ku waajib ah iney go'aamiso hadii uu ilmuhu u baahan yahay Waxbarashada Kumeelgaadhka ah isla markaana ay u gudbiso codsiga DESE. Waa in DESE ka sameyso balan Waxbarashada Kumeelgaadhka koox la isla gartey oo degan meel ku dhow halka ilmuhu degan yahay. DESE waa iney dadaal ka muujiso u helitaanka ilmaha Waxbashada Kumeelgaadhka ah mudo dhan 30 maalmood ka dib go'aanka SPOE ee ah inuu ilmuhu u baahan yahay Waxbarashada Kumeelgaadhka ah.

Ilmaha Gobolku ka masuul yahay ama la nool qoys uu u dhiibey gobolku, SPOE waa iney la hadlaan wakiilka loo xilsaarey inuu daryeelo ilmaha. Arinta ilmaha isagu aan cid lahayn ee Gobolku ka masuul yahay Waxbarashada Kumeelgaadhka ah waxaa laga yaabaa inuu u dooro xaakinka maxkabada ee kiiska ilmaha gacanta ku haya.

Wakiilka Waxbarashada Kumeelgaadhka ee ilmaha loo xuley waa in aanuu wax khilaaf ah kala hor imanin ilmaha uu ka yahay wakiilka waxyaabaha uu xiiseynayo, waana inuu khibrad iyo aqoon u lahaado wakiilnimada. Lagama yaabo inuu wakiilka Waxbarshada Kumeelgaadhku uu shaqaale ka yahay wakiilada Gobolka ama kuwa bixiya adeegyada, waxbarashada, daryeela qof ka mid ah qoyska ilmaha. Qofka u qalma inuu noqdo wakiilka Waxbarashada Kumeelgaadhka ah uma shaqeeyo DESE oo lacag ma siiso DESE inuu u ahaado wakiilka Waxbarshada Kumeelgaadhka ah.

Si aad wax uga ogaato Talaabada Koobaad (First Steps), booqo shabakadaFirst Steps:
http://dese.mo.gov/special-education/first-steps.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan Talaabada Koobaad(First Steps) ee xuquuqda waalidka:

La xiriir Agaasimaha Adeegyadaada

Soo wac xafiiska SPOE teleefanka bilaashka ah:
1-866-583-2392

Kala xiriir DESE:
Office of Special Education
P.O. Box 480
Jefferson City, MO 65102-0480
(573) 751-5739; RELAY in Missouri
1-800-735-2966 Teleefanka dadka aan wax maqli kain (TDD)

Wasaarada Waxbarashada Dugsiyad Hoose iyo Sare barnaamijyadeeda iyo howlaheeduba kuma salaysna wax takoor ah sida, jinsiyada, midab, asal ahaan halka qofku ka yimid, dhidig iyo lab, da'da ama laxaad daro. Wixii su'aal ah ee la xidhiidha Barnaamijyada Wasaarada iyo meelaha adeegyada laga bixiyo, iyo sida sahlan ee ay suurtogal ugu tahay qofka laxaadka daran, waxa lagu hagaajin karaa Xafiiska Guud ee La talaiyaya Agaasimaha, Office – Civil Rights Compliance (Title VI/Title IX/504/ADA/Age Act), 6th Floor, 205 Jefferson Street, P.O. Box 480, Jefferson City, MO 65102-0480; teleefan lamber 573-526-4757 ama TTY 800-735-2966; fax lamber 573-522-4883; email civilrights@dese.mo.gov.